# Degmooyinka oo tallaalka loo kala badinayo: 24 degmo oo tallaalka boqolkiiba 45 loo badinayo

Qiyaas cusub oo uu Machadka caafimaadka dadweynuhu (FHI) sameeyay ayaa muujinaya in haddii degmooyinka qaar tallaalka loo badiyo boqolkiiba 60 ay taasi keenayso in degmooyinka uu cudurku ku yar yahay in ay bixiyaan tallaal aad uga badan boqolkiiba 35. Si looga hortago in degmooyinka qaar bixiyaan tallaal ka badan intii qorshuhu ahaa, ayaa waxaa hoos loo dhigay tallaalka dheeriga ah ee degmooyinka qaar la siinayo oo waxaa laga dhigay boqolkiiba 45.

Toddobaadkii hore ayay dawladdu go'aamisay in tallaalka loo badiyo degmooyinka uu cudurku ku badnaa ee muddada dheer ku jiray tillaabooyin adag. 24 degmo ayay ahayd in tallaalka loo badiyo boqolkiiba 60.

Waxaa islamarkaana dawladda muhiim u ahaa, welina u ah in ay degmooyinku maarayn karaan cawaaqibta ka timaadda kala badinta. Waxay degmooyinku sheegeen in aysan sahlanaan doonin, laakiin badankoodu waxay sheegeen in ay maarayn karaan.

– Waxay dawladdu ku soo gabagabaysay in aysan jiri doonin degmo bixisa wax ka badan boqolkiiba 35 tallaalkeeda. Taas oo ka dhigan in degmooyinka dheeriga la siinayo ay helayaan boqolkiiba 45 ka badan inta kuwa kale.

FHI wuxuu caddeeyay in ay kala badinto weli waxtar fiican yeelanayso, islamarkaana aan jadwalka tallaalka ee xagaaga isbeddel sidaas ah ku imaan doonin, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Sababta caddadka wax looga beddelay ayaa waxaa tusaale ahaan ka mid ah in la kordhiyay tirada degmooyinka aan tallaalka laga yarayn doonin. Waxaa kale oo uu FHI eegay sida loo qabanayo hawsha degmooyinka tallaalka loogu kala badinayo laftigeeda. Taas lama eegi jirin mararkii hore ee arrinta la qiimaynayay.

– Marka inta degmooyinka laga dhimayo lagu hayo boqolkiiba 35, waxaa yaraanaysa khatarta loogu jiro in ay degmooyinku tallaalista la daahaan. Tirada tallaalka Norway soo gaaraya aad buu u kordhi doonaa toddobaadyada soo socda. Tallaalista degmooyinkuna uma istaagi doonto tallaalka degmooyinka loo kala badiyay darteed, laakiin 24-ka degmo ee tallaalka loo badiyay ayay tallaalista ku dhakhsan doona, ayuu yiri Høie.
Haddii tallaalku noo soo gaaro sida la filayo, markaas ilaa bisha luuliyo bartammaheeda ayaa tallaalka loo fidin doonaa dhammaan dadka 18 sano ka weyn ee ku nool 24-ka degmo. Sidaas ayay muujinaysaa saadaasha FHI.

– Warbixintii ugu danbaysa waxay sheegaysaa in uu toddobaadka 23-aad na soo gaari doono tallaal dhan 300 000, ee aanu na soo gaari doonin 340 000 sidii horey loo qiyaasayay. Waxaan rajaynaynaa in uu tallaalkani muddo gaaban gudaheeda na soo gaaro si aan ula soconno jadwalkii tallaalista loo dhigay, ayuu ku soo gabagabeeyay Høie.